# REPUBLIC OF SOMALILAND

Ministry of Investment Promotion



# National Investment Policy

# 2019

# TABLE OF CONTENTS


Message from the Minister ..... 5

1. Introduction ..... 7

1.1 Investment in Somaliland ..... 7

1.2 Policy Scope and Restrictions ..... 9

1.3 Approach of the Investment Policy ..... 11

1.4 Goal of the Policy ..... 12

1.5 Policy Targets ..... 15

1) Improved Coordination in Investment ..... 15

2) Public Private Partnerships ..... 15

3) Build-Operate-Transfer (BOT) ..... 16

4) Empowering Small and Medium Enterprises (SMEs) ..... 16

5) Strengthening the National Investment Regulations ..... 17

2. Guiding Principles ..... 18

2.1 Rule of Law ..... 18

2.2 Protection of Human Rights ..... 19

2.3 Free Market ..... 20

2.4 Equity and Fairness ..... 20

2.5 Shariah Compliance ..... 21

3. Legal Framework for Investment Protection ..... 23

3.1 Existing Legislations for Investment ..... 23

3.2 Investor Rights ..... 25

3.3 Protection of Intellectual Property Rights ..... 26

3.4 Enforcement of International Laws ..... 26

4. Investment Facilitation ........ 27
4.1 Visa Facilitation ........ 27
4.2 Government Guarantees and Incentives ........ 28
4.3 Fulinta Heshiiska iyo Xallinta Khilaafaadka ........ 30
5. Special Economic Zones ........ 32
6.1 Agriculture ........ 33
6.2 Livestock ........ 34
6.3 Fishing ........ 36
6.4 Industry ........ 37
6.5 Energy ........ 38
6.6 Mining ........ 38
6.7 Oil and Gas ........ 38
6.8 Gums and Resins ........ 39
7. Policy Implementation Guideline ........ 41

# List of Acronyms and Abbreviations

| | |
|---|---|
| NDP | National Development Plan |
| NIP | National Investment Policy |
| GDP | Gross Domestic Production |
| SMEs | Small and Medium Enterprises |
| BOT | Build-Operate-Transfer |
| KPI | Key Performance Indicators |
| FTP | Free Transfer of Profit |
| SEZ | Special Economic Zones |

# Message from the Minister

For developing and developed nations alike investment is a major driver of economic growth and societal progress, and both public and private investments play distinct but equally important complementary roles in the growth and development of a countries economy.

Public investment during the post-liberalisation period contributes to our national development objectives, and is key in enabling a productive and resilient economy for private investment to generate a return on investment. Furthermore, global investment flow trends and patterns have changed in this era of increased globalization and economic integration, and the Government of the Republic of Somaliland intents to capitalize upon it; ensuring Government on both the national and regional level is committed to promoting and facilitating investment ensuring that the Republic of Somaliland is the best choice.

This National Investment Policy (NIP) espouses nationwide coordination in encouraging inclusive development, and targeted promotion drives that engage all domestic and foreign investors,

# Fariinta Wasiirka

Waddamada soo koraya iyo kuwa horumaray si isku mid ah ayuu maalgashigu u yahay waxa ugu wayn ee koboc dhaqaale iyo horumar bulsho keena, maalgashiga dadweynaha iyo ka gaarka ahiba kaalin gaar ah oo muhiimaddiisa leh ayay ka qaataan koboca iyo horumarka dhaqaalaha dalka. Maalgashiga dadweynaha ee muddadii furfurnaanta dhaqaale kadib waxa uu wax kusoo kordhiyay ujeeddooyinkayaga horumarineed ee qaran, waxaanu muhiim u yahay maalgashiga gaarka ah si uu u suurogaliyo dhaqaale xasiloon oo wax soo saar leh si uu faa’iido uga soo celiyo maalgashiga. Waxa intaa dheer, qaababka iyo dhinaca uu u socdo maalgashiga dunidu waa uu isbedelay xilligan lagu gudo jiro edegaynta (globalization) iyo isdhexgalka dhaqaale, Xukuumadda Jamhuuriyadda Somalilandna waxa ay higsanaysaa in ay arrintaa ka faa’iidaysato, iyadoo xukuumaddu heer qaran iyo heer gobolba ay u taagantahay kor u qaadista iyo fududaynta maalgashiga iyadoo sugaysa in Jamhuuriyadda Somaliland ay tahay dookha ugu fiican ee maalgashi.

Siyaasadda Qaran ee Maalgashigu waxa ay kor u qaadaysaa isku xidhka qaran iyadoo dhiirrigelinaysa horumar guud, iyadoo higsigu yahay in maalgashadayaasha maxalliga ah iyo kuwa shisheeyaha ah,

companies, and other relevant stakeholders; by maintaining and fostering an establishment and economy that is friendly to investment. Therefore the current NIP will affirm and strengthen Somaliland's strategic guidance on investment in line with the Somaliland 2030 vision.

Finally, on behalf of the Government of the Republic of Somaliland and the Ministry of Investment I would like thank all stakeholder's who contributed in the formulation of this National Investment Policy.

**Mohamed Ahmed Mohamoud (Awad)**

**Minister of Investment Promotion**

shirkadaha, iyo daneeyayaasha kaleba; in la joogteeyo lana kobciyo dhaqaalaha iyo hanaanka sharci, kaasoo caawinaya maalgashiga. Siyaasadda hadda jirta ee ku qotonta maalgashiga waxay lagama maarmaan u tahay inay xoojiso habraaca istiraatijiyadeed ee Soomaaliland, kuna aadan maalgashiga, kaasoo ku qotama higsiga horumarka Soomaaliland ee sanadka 2030-ka.

Gunaanadkii, annigoo ku hadlaya magacayga iyo kan Wasaaradda Horumarinta Maalgashiga, waxaan u mahad celinayaa dhamaan daneeyayaasha, kuwaasoo wax ku kordhiyey habraaca siyaasaddaan Qaran ee maalgashiga.

**Maxamed Axmed Maxamuud (Cawad)**

**Wasiirka Wasaraadda Horumarinta Maalgashiga**

# 1. Introduction

## *1.1 Investment in Somaliland*

Somaliland has in abundance investable natural resources such as minerals, oil, marine resources, frankincense, livestock, and various other raw materials. As such Somaliland seeks and encourages private investors to invest in these resources. During the last two decades, Somaliland has been struggling to create economic liberalization as a driver of economic growth in the Country. Somaliland national economic system is embedded in its constitution where the economic activities in the Country are based on the main principles of free market, fair treatment and circulation of wealth where it also prevents the wealth to remain in one hand and unlawful enrichment as well.

Being aware of the changing environment for investment, the Government has maintained its commitment to fostering an economic and legal regime that is friendly for both foreign and domestic investments.

# 1. Hordhac

## *1.1 Maalgashiga Somaliland*

Soomaaliland waxay leedahay khayraad badan oo dabiici ah oo la maalgashan karo, waxaana ka mid ah macdanaha, shidaalka, khayraadka badda, xabagta iyo beeyada, xoolaha nool iyo qaybo badan oo kala duwan oo alaabooyinka ceedhin ah. Sidaa darteed waxay raadinaysa, dhiiri-gelinna u samaynaysaa maalgashadayaasha gaarka ah si ay maalgashi ugu sameeyaan khayraadkan. Labaatandkii sano ee u danbeeyay, Somaliland waxa ay u halgamaysay in ay abuurto dhaqaale furfuran kaasoo keenaya koboc dhaqaale oo Dalku yeesho. Nidaamka dhaqaale ee Somaliland waxa uu ku cadyahay dastuurka Dalka iyadoo hawlaha dhaqaale iyo ganacsi ee Dalku ay saldhig u yihiin mabaadi'da waawayn ee suuqa xorta ah, in si caddaalad ah loola dhaqmo ganacsiyada iyo in hantidu ay wareegto si looga hortago in hantidu cid gaar ah gacanteeda gasho iyo in dadku sifo aan sharci ahayn ay ku xoolaystaan. Si loola socdo isbedelada xaaladaha maalgelineed, Xukuumaddu waxay joogtaynaysaa fulinta dhiirigelinta dhaqaalaha iyo maamulka sharci ee caawinaya maalgashiga gudaha iyo ka shisheeyaba.

This commitment has resulted in to attract international investors including oil and gas companies. As a result this commitment and enhancement of economic liberalization; the Ministry of Investment Promotion has established this National Investment Policy (NIP).

Arrintaani waxay dhalisay in lasoo soo jiidato maalgashadayaal caalamiya oo ay ka mid yihiin shirkado maalgashaday gaasta iyo saliidda. Iyadoo laga duulayo fulinta ballanqaadka iyo kor u qaadista furfurnaanta dhaqaalaha; Wasaaradda Horumarinta Maalgashigu waxa ay samaysay Siyaasaddan Qaran ee Maalgashiga

## *1.2 Policy Scope and Restrictions*

The NIP provides an outline of the current investment promotion and facilitation framework, processes and procedures including the governing laws and regulations. It makes proposals on the reforms that will be required to make Somaliland a destination of choice for investors with a conducive business environment that is consistent with the global economic development reforms. It proposes the guiding principles that will be observed in the exercise of promoting and facilitating investments.

This policy applies to all public sector institutions, including Government ministries, autonomous agencies, independent commissions, judicial and legislative bodies, national and international non-Governmental organizations, and private entities implementing investment related initiatives, including domestic investors and foreign investors.

## *1.2 Baaxadda iyo Dabarrada Siyaasadda*

Siyaasadda qaran ee maalgashigu waxay bixinaysaa aasaas kor u qaadaya maalgashiga wakhtigan jira iyo fududaynta qaab sharciyeedka, habraaca iyo nidaamka ay ka midka yihiin xeerarka iyo xeer-nidaamiyeyaasha lagu dhaqayo. Wuxuu soo gudbinayaa in dib-u-habayn lagu samayn doono jihada ay u baahan tahay in Soomaaliland ay u socoto, kuna dooranayso maalgashadayaasha, si loo helo degaan ganacsi. Waxay soo jeedinaysaa haggis ku aadan qodobada sharci noqon doona in lagu dabaqo kor u qaadista iyo fududaynta maalgashadayaasha, sidoo kale hab raac dibu habayn. Qaab dhismeedka haya’adeed iyo hab raac loo maro fulinta, heerka ka warbixin, qaabaynta iyo nidaamka kadib lagu hormarin doono.

Siyaasadaan waxaa lagu hagayaa dhamaan hay’addaha dawladda, oo ay ka mid yihiin wasaaraddaha dawladdu, hay’addaha maamul ee gobollada, gudiyada madaxa banaan, maxkamadaha iyo xubnaha sharci dejinta, hay’addaha qaran iyo kuwa caalamiga ah ee aan dawliga ahayn iyo talaabooyinka lagu fulinayo maalgashiga gaarka loo leyahay.

At the national level, Ministry of Investment Promotion is responsible for the overall implementation of this NIP and also the recommendations of the reform measures in the policy, while at the sectoral level, concerned ministries are responsible for the sectoral implementation and application of this policy and in accordance with the Somaliland National Development Plan framework.

At the very initial instance of investing in the Country; the Directorate of Investment at the Ministry of Investment Promotion is responsible for the implementation and provision of guidance on the necessary steps to achieve the desired policy and regulatory space through the proposed measures of this NIP.

This policy and associated reports can only be utilized for the purpose of the development and performance improvement of public services. It is prohibited to use the policy mandated activities and their reports for private gain, political purpose, and any kind of malicious intention, whatsoever.

Heer qaran, Wasaaradda Maalgashigu waxay masuul ka tahay fulinta Siyaasaddan Qaran ee Maalgashiga iyo sidoo kale talo soo jeedino ay ka bixiso talaabooyinka dib-u-habaynta loogu samaynayo siyaasadda, halka heerka wadaageedna, wasaaradaha ay khusayso ay iyaguna masuul ka yihiin fulinta heerka wadaag iyo dabbaqidda siyaasaddan iyo si waafaqsan Qorshaha Horumarinta Somaliland.

Marka ugu horraysa ee Dalka la maalgashanayo; Agaasimaha Waaxda Maalgashiga ee Wasaaradda Horumarinta Maalgashiga ayaa ka masuul ah fulinta iyo tilmaan-bixinta ku aaddan tallaabooyinka lagama maarmaanka ah ee lagu gaadhayo siyaasadda la rabo iyo meesha lagu maamulayo iyadoo la raacayo tallaabooyinka Siyaasaddan Qaran ee Maalgashi.

Siyaasaddan iyo warbixinaha la socda ayaa kaliya loo isticmaalikaraa ujeeddada laga leeyahay horumarka iyo horumarinta waxqabadka ee adeegyada dawladda. Way reebbantahay in hawlaha siyaasaddan jidaynayso iyo warbixinaha la socdaba loo adeegsado ka faa’iidaysi gaar ahaaneed, ujeeddo siyaasadeed, iyo wax kasta oo ku talogal xun xanbaarsan waxa uu doonoba ha noqdee.

### *1.3 Approach of the Investment Policy*

This National Investment Policy (NIP) is designed to easing out all sectors for both foreign and domestic investors through specific interventions for simplifying of doing business with reduced processes.

Strategically Somaliland is located between the Middle East and Africa alongside the busy Gulf of Aden. The Country has a significant potential to become the connection of the regional trade and investment hub with more connectivity through land, sea, and air routes.

The country has a large and growing domestic consumer market, which could become a powerful draw with enhanced buying power parity and it is a strategic trading window to the neighboring country, Ethiopia, almost a hundred-million land-locked population who mainly rely on Berbera port to get connected with the world trade.

The Policy thereby has a forward looking and out-reach approach and thereby designed to keep “what an investor is interested in” in a preferred investment location like Somliland.

### *1.3 Hannaanka Siyaasadda Maalgashi*

Siyaasaddan Qaran ee Maalgashi waxa loogu talogalay in ay maalgashadayaasha gudaha iyo kuwa shisheeyaba u fududayso in ay maalgashadaan dhammaan wadaagyada iyadoo loo marayo tallaabooyin cadcad oo fududaynaya in la sameeyo ganacsi habka loo marayo lasoo koobay.

Istiraatiiji ahaan, Somaliland waxa ay ku taallaa Bariga Dhexe iyo Africa dhexdooda iyadoo ku dhinac taalla Gacanka Cadmeed ee mashquulka badan. Dalku waxa uu muhiim u yahay in uu noqdo mid isku xidha ganacsiga gobolka ka socda iyo maalgashiga isagoo leh bad, berri iyo hawoba.

Dalku waxa uu leeyahay suuq macmiil oo ballaadhan, kaasoo ka dhigikara Dalka mid awood u yeesha in uu soo jiito maalgashadaha. Waxa uu daaqad ganacsi oo muhiim ah u yahay dalka jaarka la ah ee Itoobiya, oo dadkiisu ku dhawyihiin boqol milyan oo waliba bilaa bad ah iskuna hallaynkara dekedda Berbera si ay ugu xidhmaan ganacsiga dunida.

Siyaasaddani waxa ay leedahay yool iyo aragti fog waxaanay ku dhisantahay aragtida ah “waxa uu maalgashaduhu danaynayo” marka ay jirto goob maalgashi oo Somaliland ah oo uu danaynayaa

## *1.4 Goal of the Policy*

The main goal of the NIP is to attract investment so as to contribute to the economic growth of the Country and to encourage economic diversification and transformation. This is intended to increase national domestic production (GDP) in line with Somaliland Vision 2030 which provides for balanced, sustainable, and equitable investments that results in poverty reduction, increasing employment rate and economic development, where these investments are expected to also introduce innovative methods of production and technology.

The specific objectives of the NIP are to:

1) To boost Foreign Director Investment (FDI) and domestic investment in alignment with the National Development Plan and Somaliland Vision 2030;
2) To strengthen and streamline national investment liberalization in accordance with Country's laws and regulations;

## *1.4 Ujeeddada Siyaasadda*

Ujeedada siyaasadda qaran ee maalgashigu waa inay soo jiidato maalgelinta wax ku kordhinaysa korodhka iyo dhiiri gelinta dhaqaalaha, sidoo kale waxay dhiiri gelinaysaa kala duwanaanta iyo isbedelka. Tanoo looga gol leeyahay in kor loogu qaado wax soo saarka qaran ee gudaha (GDP), oo waafaqsan higsiga Soomaaliland ee sanadka 2030, kaasoo bixinaya dheeli tir, joogtayn iyo maalgelin la hubo oo keena shaqo abuur iyo horumar dhaqaale, halka sidoo kale ku hagaya soo saaridda ilaha khayraadka dabiiciga ah ee wadanka. Maalgashiyadaan sidoo kale waxay keenayaa nidaam dibu habayn oo wax soo saarka iyo farsamada casriga ah.

Ujeeddooyinka gaarka ah ee Siyaasaddan Qaran ee Maalgashigu waa sidan soo socota:-

1) Kor u qaadista Maalgashiga Shisheeye ee Tooska ah iyo maalgashiga maxalliga ah ahba iyadoo lala jaanqaadsiinayo Qorshaha Horumarinta Qaranka iyo Yoolka Somaliland ee 2030.

3) To establish an enabling environment for corporations to be able to improve their productivity and competitiveness so that they improve the efficiency to maximize returns on investments;

4) To empower Small and Medium Enterprises (SMEs) to grow into medium and large industrial and manufacturing centers in order to maximize their impact on Somaliland's economic growth. This will be done through promoting the establishment of economic zones with facilities for work spaces, incubation, and other business development services;

5) To strengthen the legal and regulatory regime for investment protection by having policy coherence and comprehensiveness, as well as ensuring the adequacy and harmonization of existing legal mechanisms and policies;

2) In loo xoojiyo loona casriyeeyo furfurnaanta maalgashiga qaranka si waafaqsan xeerarka Dalka;

3) In loo suurogaliyo deegaan ku habboon shirkadaha si ay ugu suurogasho in ay horumariyaan wax soo saarkooda iyo tartanka ka dhexeeyaba sidaa darteedna ay u horumariyaan kartidooda ku aaddan in ay badiyaan faa'iidada uga soo noqonaysa maalgashiga;

4) In kor loogu qaado awoodda shirkadaha yar yar iyo kuwa dhexeba si ay ugu koraan kuwa dhexe iyo xarumaha warshadaha wax soo saara ee waawayn si ay u badato saamayntooda ay ku leeyihiin koboca dhaqaale ee Somaliland. Tani waxa ay ku suurogalaysaa in kor loo qaado hirgelinta aagag dhaqaale oo leh waxyaabihii u fudaydinayay goobahooda shaqo, horumarkooda iyo adeegyada horumarineed ee ganacsi ee kale.

6) To establish Review Mechanisms for improving the legitimacy and consistency of the NIP and to achieve this objective; the feedback from the foreign and domestic investors, and other national and international stakeholders are incorporated with Key Performance Indicators (KPIs) to review the NIP regularly;

7) To establish Effective Decision-Making process, where investment promotion related decisions are streamlined through identified institutional arrangements to avoid contradictory multiple and/or duplicate decisions that may affect the investor's right.

5) In loo xoojiyo nidaamka sharci ee lagu maamulayo ilaalinta maalgashiga iyadoo la dhawrayo dhamaystirnaanta siyaasadda iyo sidoo kale in la hubiyo in xeerarkii hore u jiray ku filanyihin iyo in la iswaafajiyo xeerarka iyo siyaasadaha.

6) In la sameeyo hab dib u eegiseed oo lagu horumarinayo sharciyadda iyo iswaafaqsanaanta Siyaasadda Qaran ee Maalgashiga iyo gaadhista ujeeddooyinka; warcelinta laga helo maalgashadayaasha shisheeye iyo kuwa gudahaba, iyo daneeyayaasha dalka iyo kuwa caalamiga ahba iyadoo loo adeegsanayo Hagayaasha Waxqabad ee Muhiimka ah iyo in dib u eegis joogto ah lagu sameeyo Siyaasadda Qaran ee Maalgashiga.

7) In la abuuro hab go'aan-qaadasho oo sax ah, iyadoo go'aannada la xidhiidha horumarinta maalgashiga loo dejinayo hab hay'adeed oo diyaargaraw ka samaynaya si looga dheeraado go'aanno isburiyaa in ay soo baxaan kuwaasoo saamaynkara xuquuqda maalgashadaha.

## *1.5 Policy Targets*

NIP in line with Government's economic strategies has the following targets:

### 1) Improved Coordination in Investment

This policy intends to have better coordination between the Government agencies that involve in the key sectors of production including, the Ministry of Agriculture, the Ministry of Fishing, the Ministry of Energy and Natural Resources, the Ministry of Livestock, the Chamber of Commerce, and other relevant regulating authorities with the Ministry of Investment Promotion.

### 2) Public Private Partnerships

Somaliland Government stands for establishing viable Public Private Partnerships (PPPs) to address large scale infrastructure development that are beyond the financing capacities of the Government. PPPs are an important initiative for infusing private sector management disciplines and efficiency into the development and delivery of public infrastructure and services.

## *1.5 Yoolalka Siyaasadda*

Siyaasadda Qaran ee Maalgashigu waa hab-raac ay Xukuumaddu u jeexday dhaqaalaha, yoolka la higsanayaana wuxuu noqonayaa sidan soo socota:

### 1) Kor u Qaadista isku Dubaridka Maalgashiga

Siyaasadaani waxay u taagan tahay inay qabato isku dubarid wanaagsan oo u dhexeeya hay'addaha dawladda ee ku lugta leh qaybaha muhiimka ah ee wax soo saarka oo ay ka mid tahay, wasaarada beeraha, wasaaradda kalluumaysiga, wasaaradda tamarta iyo khayraadka dabiiciga ah, wasaaradda xanaanada xoolaha, ururka ganacsiga iyo qaybaha kale ee maamulka dawladeed ee xidhiidhka la leh wasaaradda maalgashiga. Kor u qaadista lagu sameeyo isku duwidda waxay daboolaysaa marnaansho kasta oo jawaab ay ku siin kari lahayd dawladdu qaybaha ganacsiga ee gaarka loo leeyahay. Waxay kaloo ujeedkeedu tahay in lala socda heerka maalgashiga cusub uu u shaqaynayo iyo in galangal loo yeesho suuqyada cusub, si loo helo hab isku xidhan oo ay sal u tahay korodhka dhaqaaluhu.

PPP investments are substantially important for stimulating increased investment in economic activities as well as external trade facilitation.

### 3) Build-Operate-Transfer (BOT)

Under the PPP investments, Build-Operate-Transfer (BOT) contracts can be entered into between the Government of Somaliland and the investor. The main aim of the establishment of BOT contracts is to enable investors to contribute to the development of economic infrastructures by means of financing large developmental projects.

For the establishment of BOT contracts; special procedures for facilitation should be employed by the Government of Somaliland.

### 4) Empowering Small and Medium Enterprises (SMEs)

The Government of Somaliland strongly believes in the empowerment and fully supports SMEs and the NIP aims to implement this agenda for strong SMEs that bring about more jobs for young generation.

### 2) Iskaashatooyinka Dawladda iyo Dadka

Xukuumadda Soomaaliland waxay u taagan tahay inay abuurto nidaam cadaynaya wax wadaagista hay'ayadaha dawladda iyo kuwa ganacsiga gaarka loo leeyahay (PPPs) si loo xaliyo heerka balaadhan ee horumarinta kaabayaasha ka baxsan awoodaha maaliyadeed ee dawladda. Hanaanka wax isku darsiga dawladda iyo ganacsiyada gaarka loo leeyahay wuxuu talaabo muhiim ah u yahay inuu xoojiyo maamulka qaybaha gaarka loo leeyahay, daahfurnaanta iyo wax tarka ay u leeyihiin horumarka, sidoo kale wax ku kordhinta kaabayaasha dawladda iyo adeegyada.

Sidaa darteed, Maalgashiga PPPs wuxuu wax tar muhiim ah u leeyahay inuu kor u qaado arrimaha dhaqaalaha, sidoo kale fududaynta ganacsiga dibadda.

### 3) Nidaamka Maalgelineed ee BOT (Build-Operate-Transfer)

Iyadoo la raacayo nidaamka maalgelineed ee iskaashatooyinka dawladda iyo dadka gaarka ah (PPPs), Xukuumadda Somaliland iyo maalgashaduhu waxa ay wada galikaraan heshiisyo maalgelineed oo ku dhisan nidaamka loo yaqaanno Buil-Operate-Transfer (BOT).

This policy aims at harnessing the creative and innovative potential of SMEs in Somaliland as SMEs may partially cover the demands of a population that is seeking employment opportunities and a closer integration with the world economy.

### 5) Strengthening the National Investment Regulations

The Somaliland Investment Act signifies that the provisions of the legislation should be consistent with the National Investment Policy as far as it is facilitating and promoting investment.

Ujeeddada ugu wayn ee laga leeyahay gelidda heshiisyadaasi waa in maalgashadaha loo suurogaliyo in uu ka qaybqaato horumarinta kaabayaasha dhaqaale isagoo maalgelinaya mashaariic horumarineed oo waawayn. Si loo hirgeliyo heshiisyadaa ku salaysan nidaamka BOT; hab-raac gaar ah oo lagu fududaynayo ayay hirgelindoontaa Xukuumadda Somaliland.

### 4) Xoojinta Ganacsiyada Yaryar iyo Kuwa Dhexe (Small and Medium Enterprises)

Xukuumadda Somaliland waxay si xoog leh u rumaysan tahay tayaynta iyo in taageero la siiyo shirkadaha yar yar iyo kuwa heerka dhexe, Siyaasadda Qaran ee Maalgashiguna waxa ujeedooyinkeeda ka mid ah in la fuliyo qorshahan, si loo xoojiyo shirkadaha ganacsiga yar yar iyo kuwa heerka dhexe, kuwaasoo keenaya abuuritaanka shaqooyin badan oo da'yartu hesho. Siyaasadaani waxay leedahay ujeedooyin lagula soconayo awoodda hal-abuurka ee shirkadaha ganacsiga yar yar iyo kuwa heerka dhexe ee Soomaaliland ka jira, maadaama ay qayb ahaan daboolayaan baahiyaha bulshada, kuwaasoo raadinaya fursado shaqo iyo inay ku xidhmaan dhaqaalaha dunida.

# 2. Guiding Principles

Competition for investment and changing global circumstances necessitate a dynamic investment policy framework. To ensure responsiveness to the ongoing changes in the global and domestic economy, a phased reform of the investment policy framework is developed and implemented. Considering and taking into account the good investment policy principles outlined below, the Government of the Republic of Somaliland will implement a reform action plan aimed at advancing its vision to grow domestic and foreign investment.

It will take into consideration the guiding principles postulated below to guide its existing interactions with investors as well as its reform processes.

### *2.1 Rule of Law*

Somaliland has legal processes, institutions and substantive norms that are consistent with the human rights. This includes equality under the law, accountability before the law, fairness, protection and vindication of rights. All persons, institutions and entities, public and private, including the State, are equal under and accountable to the laws that are publicly promulgated in the Country.

**5) Adkaynta Xeer-nidaamiyeyaasha Qaran ee Maalgelinta**

Xeerka Maalgashiga ee Somaliland ayaa muujinaya in qodobada sharci ay waafaqsanaadaan Siyaasadda Qaran ee Maalgashiga maadaama ay fududaynayso oo ay kor u qaadayso maalgashiga.

# 2. Mabaadi'da Maalgashiga Hagaysa

Tartanta loogu jiro maalgelinta iyo duruufaha dunida ee isbedbedelaya ayaa daruuri ka dhigaya in la dejiyo qaab-dhismeedka siyaasad maalgelineed. Si jawaab loogu helo isbeddeladaa dunida iyo dhaqaalaha dalka gudihiisa, ayaa dib u habayn iyo horumarin loogu sameeyay qaab-dhismeedka siyaasadeed ee maalgashiga. Iyadoo xisaabta lagu darsanayo lana tixgelinayo mabaadi'da siyaasadda maalgelineed ee wanaagsan ee hoos ku xusan, ayaa Xukuumadda Jamhuuriyadda Somaliland waxa ay hirgelindoontaa qorshe-hawleed dib u habayn loogu samaynayo loogana danleeyahay in ay kor u qaaddo aragtideeda ku aaddan maalgashiga gudaha iyo ka shisheeyaba.

These laws are equally enforced and independently adjudicated. This principle indicates as the milestone of the supremacy of law and avoidance of the arbitrary systems. This principle is enshrined in the Constitution of Somaliland.

## *2.2 Protection of Human Rights*

The Somaliland Government is committed to protecting and promoting basic and fundamental rights and freedoms. This includes freedom of speech, opinion, religion, association, movement and as well as trade. These rights and freedoms are protected by the Country's Constitution. Principally, the legislation should not infringe any of the fundamental rights and freedoms unless the legislation expresses a clear intention to do so and the infringement is based on legal justification embedded in the Country's laws.

The Government believes that these rights and freedoms underpin Somaliland's democracy and rule of law. Therefore, some key steps have to be taken to ensure that these rights and freedoms are not only protected but also promoted.

Waxa ay xisaabta ku darsanaysaa magaadi'da hoos ku xusani in ay hagto xidhiidhka ay la leedahay maalgashadayaasha iyo hanaankeeda dib u habayneed ee siyaasadda maalgashiga.

## *2.1 Sarraynta Sharciga*

Somaliland waxa ay leedahay hanaan sharci, hay'ado iyo hab-dhaqan muhiim ah oo la jaanqaadaya xuquuqaha adaamaha.Waxa taas ka mid ah in sharciga loo siman yahay, sharciga la iskula xisaabtamo, caddaalad, iyo ilaalinta xuquuqda. Dhammaan dadka, hay'adaha iyo shirkaduhuba, mid dadwayne iyo mid gaar loo leeyahayba, oo ay Dawladduna ku jirto, waxa ay u siman yihiin sharciga, sharciga Dalka ayaana lagula xisaabtamayaa.

Shuruucdaa ayaa si siman loogu dhaqayaa qof kastana sidiisa ayuu u qabanayaa. Mabda'anid waxa uu muujinayaa muhiimadda sarraynta sharciga iyo in laga dheeraado nidaam xeer-jajab ah. Mabda'ani waa mid laga dheehanayo Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland.

## *2.2 Ilaalinta Xuquuqda Aadamaha*

Xukuumadda Somaliland waxa ay u taagantahay ilaalinta iyo kor u qaadista xuquuqaha iyo xorriyadaha aasaasiga ah.

All commercial practices are allowed unless they are involved in unlawful commercial activity and unlawful enrichment.

### *2.3 Free Market*

The Economic System of Somaliland is a free market system based on supply and demand with little or no Government control. It is comprised of voluntary exchanges that take place in a given economic environment. Somaliland's free markets are characterized by spontaneous and decentralized order of arrangements through which individuals make economic decisions.

Somaliland's free market is one where voluntary exchange alongside the laws of supply and demand provide the sole basis for the economic system.

### *2.4 Equity and Fairness*

All citizens of Somaliland shall enjoy equal rights and obligations before the law, and shall not be accorded precedence on grounds of colour, clan, birth, language, gender, property, status, opinion etc.

Waxa arrintan soo hoos galaya xorriyadda hadalka, ra'yi dhiibashada, diinta, ururrada, dhaqdhaqaaqa iyo sidoo kale ganacsiga. Xuquuqahan iyo xorriyadahan waxa ilaaliya Dastuurka Dalka. Mabda' ahaan, sharciga la samaynayaa waa in aanu meel kaga dhicin xuquuqaha iyo xorriyadaha aasaasiga ah marka laga yimaaddo in xeerku uu si cad u tilmaamo isla markaana meel ka dhacaas loo haysto sabab sharci oo ay xeerarka Dalku caddeeyeen. Dawladdu waxa ay rumaysantahay in xuquuqahaa iyo xorriyadahaasi ay tilmaan u yihiin dimuqraadiyadda iyo sarraynta sharciga ee Somaliland ka jira. Sidaa darteed, tallaabooyin muhiim ah oo lagu hubinayo in xuquuqahaa iyo xorriyadahaa kaliya aan la ilaalinne balse sidoo kale kor loo qaaday waa in la qaado.

Dhammaan hawlaha ganacsi waa la ogolyahay haddii aanay ku lug lahayn hawl ganacsi oo aan bannaanayn ama in sifo sharci-darro ah lagu xoolaysanayo.

### *2.3 Suuq Xor ah*

Nidaamka dhaqaale ee Somaliland waa mid ku dhisan nidaamka suuqa xorta ah iyadoo ay yar tahay ama aanay jirinba farogalin dawladeed. Waa nidaam ah in dadku si xor

ah wax isu waydaarsadaan iyagoo dadku go'aannadooda dhaqaale qaata.

As well, foreigners lawfully residing in Somaliland equally enjoy the same rights and obligations before the law as citizens, save for the political rights which are reserved for Somaliland citizens only.

Equality before the law is a fundamental concept in Somaliland legal system. All judicial officers take an oath to administer the law without fear, favour, affection or ill-will. Judicial officers must treat all parties fairly regardless of gender, ethnicity, disability, sexuality, age, religious affiliation, socio-economic background, size or nature of family, literacy level and/or any other form of identity.

## *2.5 Shariah Compliance*

The citizens of Somaliland 100% believe in Islam as their religion. Article 5 of the Somaliland constitution vividly states that Islam is the religion of the state. Thus prohibiting the promotion and preaching of any other religion other than Islam. This article also emphasizes that the laws of the nation shall be grounded in the shariah law.

Suuqa xorta ah ee Somaliland waa mid iyagoo dadku si ikhtiyaari ah wax isu waydaarsanaya haddana raacaya shuruucda iibinta iyo dalabta ee uu leeyahay nidaamka dhaqaale.

## *2.4 Sinnaan iyo Caddaalad*

Dhammaan muwaadiniinta Somaliland waxa ay leeyihiin xuquuq iyo waajibaad isku mid ah sharciga hortiisa lagumana kala sarraysiinkaro midab, qabiil, dhalasho, af, jinsi, hanti, darajo, ra'yi IWM. Sida oo kale, dadka ajnabiga ah ee sifo sharci ah ku jooga Somaliland waxa ay iyaguna leeyihiin xuquuq iyo waajibaad la siman muwaadiniinta sharciga hortiisa, marka laga soo reebo xuquuqda siyaasadeed oo ay kaliya leeyihiin muwaadiniinta u dhashay Somaliland. In sharciga loo sinnaadaa waa aragti aasaasi ah oo ku cad nidaamka sharci ee Somaliland. Dhammaan saraakiisah garsoorku waxa ay ku dhaarsanyihiin in ay sharciga wax ku kala saaraan iyagoon ka cabsanayn, u eexanayn, aan cid gaar ah jeclaysanayn ama niyad-xun aan lahayn. Saraakiisha garsoorku waa in ay dhinacyada si isku mid ah ula dhaqmaan iyagoon u kala eegayn jinsiga, isirka, laxaadka, da'da, diinta, xaaladdiisa dhaqan-dhaqaale, heerkiisa aqooneed ama wax kale oo uu ku aqoonsankaro.

Thereby anything that is contrary to Shariah is null and void. In the light of this article morality and religion is inseparable. Based on this principle, *usury and commercial practices* which are against the interests of the society and unlawful enrichment are prohibited.

### *2.5 Dabbaqidda Shareecada*

Muwaadiniinta Somaliland 100% waa Muslim rumaysan Diinta Islaamka. Qodobka 5aad ee Dastuurka Somaliland waxa uu si cad u sheegayaa in Islaamku yahay diinta Dalka. Sidaa darteed, in ay reebbantahay in diin aan Islaamka ahayn lagu faafiyo Dalka. Qodobkani waxa uu sidoo kale xoogga saarayaa in xeerarka Dalka sal looga dhigayo Shareecada. Sidaa darteed, wax kasta oo lid ku ah Shareecadu waa waxba kama jiraan baadil ah. Iyadoo qodobkaa laga duulayo, anshaxa iyo diintu waa laba arrimood oo aan la kala sooci Karin. Iyadoo ay mabda’an ku salaysantahay, ribada iyo hawlaha ganacsi ee lidka ku ah danaha bulshada iyo in qofku xoolo ku helo sifo aan sharci ahayn waa waxyaabaha reebban.

# 3. Legal Framework for Investment Protection

## *3.1 Existing Legislations for Investment*

The Republic of Somaliland has promulgated a set of laws and regulations that deal with investments in a way or another. Furthermore, the Government has established policies, including this National Investment Policy, to facilitate for investors, whether domestic or foreign, the possibility to decide the best manner in which they utilize the investment opportunities in the Country.

Nonetheless, the regulation of investments in Somaliland is sectoral in nature and are is therefore guided by the various regulations within the sectors, whose mandate is found in different Government departments. The following Acts regulate the general conduct of business in Somaliland for different activities:-

1) The Companies Act 80 of 2018
2) Trade Classification Act 26 of 2004
3) National Livestock Act 34 of 2006

# 3. Qaab-dhismeedka Sharci ee Ilaalinta Maalgashiga

## *3.1 Sharciyada Maalgashi ee Jira*

